



Waa maxay haddii aad hayso wax walaacyo ah ama su'aalo?

Haddii aad dareento in qorshahaagii ku noqoshada shaqadu aanu u socon sida la qorsheeyay, iska hubi inaad u oggolaato bixiyahaaga daryeelka caafimaad, loo shaqeyaha iyo WCB inaad la xidhiidho si ay u ogaadaan walaacyadaada.

Side ayay WCB uga qayb qaadanaysaa?

- La xidhiidhkaaga WCB waxa ay maamuli doontaa qorshahaaga RTW waxa ayna kaa caawin doontaa bixinta khasaaraha mushaharka.
- La xidhiidhkaaga WCB waxa ay ku lug yeelan doontaa inay kaa kaalmayso haddii aad caawin uga baahan tahay qorshaha RTW – halkan waxa aanu u joognaa inaan ku caawino.

**Hadii aad shaqada
ku dhaawacantiid waxaan
halkan u
joognaa inaan ku caawino.**

Sida na Loola soo Xidhiidhi Karo

Workers Compensation Board of Manitoba
333 Broadway, Winnipeg, MB R3C 4W3

Iimayl noogu soo dir
wcb@wcb.mb.ca

Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo
www.wcb.mb.ca

Ama naga soo wac
204-954-4321

Ama lambarka bilaashka ah
1-855-954-4321

Tabi khayaanada iyo sharci jabinta

Wac 204-888-8081, ama lambarka lacag
la'aanta ah, 1-844-888-8081

Iimaylka Compliance@wcb.mb.ca

Shaqo BADQABTA waa masuuliyadda qof kasta.
Kahortagga dhaawacyadu wuxuu u fiican yahay
loo-shaqeyayaasha iyo shaqaalahaba.

Si aad wax dheeraad ah u ogaado, booqo:

safemanitoba.com

Ama wac 204-957-SAFE (7233) Winnipeg
Ama 1-855-957-SAFE (7233) dibadda Winnipeg



**Shaqada ku
noqo si aad**

**SI FIICAN UGU
BOGSOTO**



**Hadii aad shaqada
ku dhaawacantiid waxaan
halkan u
joognaa inaan ku caawino.**

Ku noqoshada Shaqadu waxa ay kaa Caawinaysaa Bogsashada

Kusoo noqoshada shaqo kadib dhaawac goob shaqo waa hab tallaabo tallaabo ah kaasi oo ka bilaabma goobtaada shaqo, si uu kuu kaalmeeyo kadib marka lagu dhaawaco ama aad xanuunsato. Tallaabada koowaad waa inaad hesho adeegyada daryeelka caafimaadka aad u baahan tahay si ay kaaga caawiyaan bogsashada. Tallaabada xigtaa waa inaad bilawdo qorshaha ku noqoshada shaqadaada (RTW). Ku noqoshada shaqada isla marka ay jidh ahaan iyo badbaado ahaanba suurtagal tahay waxa ay kaa caawinayaan bogsashada.

Badanaa loo shaqeeyahaagu waxa uu la habeyaa habka shaqo ku noqoshadaada adiga iyo bixiyaha daryeelkaaga caafimaad. Ururkaaga iyo/ama wakillada guddida caafimaadka iyo badbaadada shaqaaluhu ayaa kamid noqon kara, xidhiidhkaaga WCB. Qorshe ayaa la horumariyay kuna salaysan soojeedinta bixiyaha daryeelkaaga caafimaad iyo waxa aad awoodo inaad qabato marka aad shaqada kusoo noqoto. Qorshahaaga RTW waxa kujiri kara baddelka shaqooyinka ama yaraynta saacadaha shaqada.

Tallaabada koowaad waa inaad hesho adeegyada daryeelka caafimaadka aad u baahan tahay si ay kaaga caawiyaan bogsashada.

Dheefaha

Barnaamijka ku noqoshada shaqadu waxa uu faa'iido kuu leeyahay:

- Inuu ka caawiyo inaad hore u bogsato gabi ahaanba dhaawacaaga
- Inaad hesho deganaanshaha shaqadaada
- Inay kaa caawiyaan inaad hawsha si deg-deg ah ugu noqoto iyo mustaqbalka oo aan hubaal la'aan ahayn.

Sidee Ayaad Uga Qayb Qaadan kartaa?

- Qayb fir-fircoon ka noqo qorshaha RTW sidii la isku raacay dhammaan wada xaajoodyada.
- Kasoo qaybgal dhammaan ballamaha caafimaad raacna qorshaha daaweynta lagu qoray.
- Ka caawi bixiyaha daryeelahaaga caafimaad inuu fahmo nooca shaqada aad qabato.
- La xidhiidh markasta WCB iyo loo shaqeeyahaaga si aad ugu oggolaato iyaga inay ogaadaan sida aad dareemayso, tani waxa ay kaa caawinaysaa inaad ku xidhnaato goobtaada shaqada waxa ayna ka caawinaysaa loo shaqeeyahaagu uu qorsheeyo shaqo taasi oo aad awoodo inaad qabato marka aad ladnaato.

Sidee ayuu loo shaqeeyahaagu uga qayb qaadanayaa?

- Loo shaqeeyahaagu waa inuu la shaqeeyaa adiga iyo bixiyaha daryeelahaaga caafimaad si uu u horumariyo qorshe ku noqosho shaqo kuna salaysan waxa aad awoodo inaad qabato.
- Loo shaqeeyahaagu sidoo kale waa inuu kula soo xidhiidhaa aanu ka taageeraa qorshahaaga ku noqoshada shaqada.

Waajibyaadyada Dib-u-shaqaalaysiinta

Sharci dajintu waxa ay uga baahan tahay loo shaqeeyahaaga kuwaasi oo haysta shaqaale 25 ama kabadan shaqeeyana wakhti buuxa ama ama qayb kamid ah inay dib u shaqaalaysiiyaan shaqaalahooga dhaawacmay kuwaasi oo shaqaale ahaa 12 bilood ka hor dhaawacooda. Macluumaad badan oo ku saabsan wajibaadka dib u shaqaalaysiinta fadlan kaga hubi si onlayn ah www.wcb.mb.ca sida uu dhigayo khayraadka, ama wac 204-954-4321 ama wicitaanka bilaashka ah 1-855-954-4321 nuqul ah buuga yare ee *Waajibyaadyada Dib-u-shaqaalaysiinta*.

Sidee ayuu Bixiyaha Daryeelkaaga Caafimaad Uga Qab qaadanayaa?

- Bixiyahaaga daryeelka caafimaad waa inuu soo jeediyaa wakhtiyada ku noqoshada shaqadaada uuna bixiyaa macluumaad ku saabsan waxyaalaha aanad qaban Karin.
- Wakhtiyadu waxa ay muujin doonaan taariikhda ugu horaysa ee soo noqoshadaada badbaadada ah si wax looga baddelo shaqooyinka ama saacadaha shaqada.
- Bixiyahaaga daryeelka caafimaad waxa uu la wadaagi doonaa loo shaqeeyahaaga macluumaad ku saabsan waxyaalaha aanad qaban Karin haddii aad bixiso oggolaanshiyo.

